# Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

*Tixraac:01/MudSomAd022* *Taariikh: 25/11/2022*

**BAAQA CADALE (ADALE DECLARATION)**

Shir ballaaran oo socday muddo labo maalmood ah oo ay isugu yimaadeen qeybaha kala duwan ee Beelweynta Mudulood sidạ; Duubabka Dhaqanka, Siyaasiyiinta, Culumaa'udiinka, Aqoonyahanka, Saraakiisha, Dhalinyarada iyo Haweenka loogana tashanayey masiirka Beesha, dadaalada nabadeynta iyo la-dagaalanka Khawaarijta, ayaa maanta oo taariikhdu tahay 25/11/2022 looga dhawaaqay Baaqa Cadale (Adale Declaration). (قال تعالى وامرهم شورى بينهم)

1. Beeshu waxa ay si buuxda u taagereysaa baaqii madaxweynaha JFS ee ahaa in khawaarijta dalka laga saaro (قال تعالى ياءيها الذين ءامنوا اطيعوالله واطيعوالرسول واولي الامرمنكم). Waxa ayna hiil iyo hooba la garab taagan tahay ciidamada qalabka sida, si ay u gutaan waajibaadkooda Qaran iyadoo u aragta la dagaalanka khawaarijta in lagu gaarayo raali ahaanshaha ilaaheey iyo janadiisa. (قال النبي (ص) طوبى لمن قتلهم او قتلوه)

2. Beeshu Waxa ay si buuxda u taageereysaa dadaalada Nabadeed oo ay wadaan duubabka dhaqanka iyo culumaa'udiinka si xalwaara u gaaraan walaalaha ay xurguftu dhex-martay. (قال تعالى. فاتقوا الله واصلحوا ذات بينكم)

3. Waxa ay ka digeysaa beeshu dhagarta khawaarijta oo caadeystay kuna howlan iska horkeenista dadka walaalaha ah si ay isaga fududeeyaan culeyska maanta ka heysta dagaalada ay iska kaashanayaan ciidamada qalabka sida iyo bulshada deegaanka, waana in laga foojignaadaa colaada iyo fitnada ay hurinayaan khawaarijta

(قال تعالى.واتقوا فتنة لا تصيبين الذين ظلموا منكم خاصة. قال النبي (ص) الفتنة نائمة فمن ايقظها فعليه لعنة الله).

4. Waxaa si buuxda beeshu hoosta uga xariiqday in qofkii qof dila sharciga la marsiiyo oo aan danbigiisa qof kale aano ahaan loogu ciqaabin/dilin.

(قال تعالى. ولكم في القصاص حياة. قال تعالى. ولا تزر وازرة وزر اخرى).

5. Beesha mudulood waxa ay si buuxda isugu waafaqday in la qaado dhammaan isbaaroyinka yaala deeganadooda taas oo dhibaato ku ah isku socodka bulshada, bed-qabkeeda, iyo horumarinta deegaanka, sababna u ah dagaalada soo noqnoqday.

(قال تعالى. انما جزاء الذين يحاربون الله ورسوله ... الخ)

6. Beeshu waxa ay dowladda ka codsaneysaa in ay tallaabo sharci ah ka qaado cid walba oo maanta kadib isbaaro u sii taalo ama garabsiineysa isbaaro.

(قال تعالى.ولاتركنوا الى الذين ظلموا فتمسكم النار وما لكم من دون الله من اولياء ثم لا تنصرون )

7. Sidoo kale waxa ay beeshu codsaneysaa in deegaanada laga xureeyey khawaarijta loo sameeyo maamul, amni iyo garsoor u horseeda bulshada caddaalad waarta, lana gaarsiiyo gurmad iyo adeegyada bulshada ee asaasiga ah. ( قال تعالى: ان الله يامر بالعدل والاحسان)

8. Waxa ay beeshu adkeyneysaa midnimada guud, wadajirka, iyo nabad ku wada noolaashaha bulshada. ( واعتصموا بحبل الله جميعا ولاتفرقوا)

9. Beesha Mudulood waxa ay ka mahad-celineysaa booqashada taariikhiga ah ee uu Madaxweynaha JFS ku joogo deegaanada beeshani degto iyo dadaalada madaxweynuhu horseedka ka yahay ee dalka looga xureynayo khawaarijta. ( قال النبي (ص) خير الناس انفعهم للناس)

10. Beeshu waxa ay ka mahad-naqeysaa kaalinta mugga leh ee ay ka qaateen madaxweynaha Hirshabelle iyo Maamulkiisaba dadaalada nabadeynta, dib u xureynta iyo martigelinta shirarka masiiriga ah. ( قال النبي (ص) من لم يشكر الناس لم يشكر الله)

11. Ugu dambeyn waxa ay beeshu go'aan buuxa ku gaartay in ay nabad ku wada noolaato sidoo kalena ay bulshada soomaaliyeed ay nabad kula noolaato iyadoo ka ambaqaadeysa halheyskii madaxweynaha ee ahaa "Soomaali heshiis ah dunidana heshiis la ah" waxa ayna leedahay "Mudulood Heshiis ah Soomaalina heshiis la ah".

( قال تعالى: والصلح خير), waxa ayna ugu baaqeysaa bulshaweynta soomaaliyeed iscafin, midnimo iyo in si wadajir ah khawaarijta kusoo duushay dalka, dadka iyo diinta meel looga soo wada jeesto, dalkana laga sifeeyo.

(قال تعالى: واقتلوهم حيث ثقفتموهم واخرجوهم من حيث اخرجوكم )

(قال النبي (ص)فاينما لقيتموهم فاقتلوهم فان في قتلهم اجرا لمن قتلهم يوم القيامة )

Mahadsanidiin

<u>Saxiixayaasha Go'aanka</u>

# Saxiixayaasha Beesha Cadele

1- Imam Dahir Imam Maxamud

2- Ugaas Maxamud Cali Ugaas

3- Boqor Cllahi Geed Shadoor

4- Hon. Abdirahman Mohamed Sheikh

5- Xil. Clrisaaq Aadam Warsame (Xusni)

2022

6- Xil. Yaasiin Cllahi Maxmed

22

7- Xil. Maxked Ibrahim Cali

8- Xil. Maxiimd Allaahi Ahmed (Abukeete)

9. Sen. Axmed Maxked Cali (Af-cadeey)

10 Gudoomiye Mohamed Toxow Abdi

11 Sheikh Clqaadir Sheikh Somow

12- Ilabar Yuusuf Madaad

13- Gen. Abdirahman M. Turyare

14- Xil Cabdinaasir Aaden Cismaan

15- Wasiir Ahmed Dhiblawe Azir

16- Xil - Maxamed Axmed Maxamed (Geraj)

17. Xil. Cabdulahi Maxamed Maxamed

18 Xil. Yusuf Ahmed Mohamed

19 Cumar. gaabowowl Cali [signature]

20 - Cumar Maxmed Caddow [signature]

21 - Xasan Maxled Caafow [signature]

22 - Axled Suleymaan Maxled AXMED